# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

**EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA**

**Sanadka 1aad** Sannadka 2009

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**

**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

Qiimadu: Waa $ 16 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $50 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 100 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda


# FAAFINTA RASMIGA AH

# EE

# JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

# Sanadka

# 2009


**Waxaa la daabacay Sanadka 2011**

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الرسمية الجريدة

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

nadka 1aad | Muqdisho | Maarso 2009 | L. 1

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

nadu: Waa $ 2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $ 20 llar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 50 Doollar. Rukunka weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha ritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – acagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda iyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

### XEER

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.42, taariikh March 28, 2009-** ***Magacaabid Madaxa haqaalaha Madaxtooyada*** **Bog.** 2

## BOGGA SEDEXAAD

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH**

***W. M***

*Waxaa la daabacay Sanadka 2011*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.42,**
**taariikh March 28, 2009**
**Magacaabid Madaxa Shaqaalaha Madaxtooyada**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 44aad ee Cahdiga KMG,

**Markuu dareemay:** Baahida loo qabo xirfad iyo khibrad si loo dhiso koox maamul tayo leh ee ka hawl gasha madaxtooyada.

**Markuu tixgeliyay:** khibradda iyo aqoonta Md. Cabdikariin Xasan Jaamac.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa mudanahaas kor ku qoran loo magacaabay in uu noqdo Madaxa Shaqaalaha Madaxooyada, isagoo ku kalsoon in uu Md. Jaamac leeyahay aqoontii iyo khibraddii uu ku gudanlahaa mas'uuliyaddaa loo dhiibay.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 28/03/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 1aad Muqdisho April 2009 L. 2

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $ 5 Doollar lambar waliba – RUKUNKA: Sanaddii waa $ 50 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 100 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN


## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER

- XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.52, taariikh April 2, 2009- *Magacaabid Madaxa Wakaaladda Nabadsugidda Qaranka (NSA)* Bog. 4

## BOGGA SEDEXAAD

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH**

***W. M***

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.52,**
**taariikh April 2, 2009**
**Magacaabid Madaxa Wakaaladda Nabadsugidda Qaranka (NSA)**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 39aad (1B) iyo qodobka 44aad (IE) aad ee Cahdiga KMG ee Jamhuuriyadda Soomaaliya |
| **Markuu qiimeeyay:** | Danta Nabadgelyada Qaranka iyo Baahida loo qabo in la abuuro madaxa Hay'adda Nabadsugidda Qaranka. |
| **Markuu tixgeliyay:** | Baahida sii badaneysa ee xagga nabadgelyada ee gudaha iyo dibadda. |
| **Markuu tixgeliyay:** | Soo jeedinta Golaha Wasiirrada ee oggolaanshaha iyo magacaabidda. |
| **Markuu dabagalay:** | Khibradda iyo aqoonta uu sarkaalkan u leeyahay nabad sugidda iyo sirdoonka oo ayna ku talabixiyeen dadkii yaqaannay. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Brig. Gen. Maxamed Sheekh Xasan u magacaabay in uu noqdo madaxa Wakaaladda Nabad sugidda Qaranka NSA). Sarkaalkan waxaa laga sugayaa in uu waajibaadkiisa qaran u guto si xirfad leh oo hufan oo waafaqsan shuruucda dalka, iyadoo la farayo Hay'adaha ku lug leh shaqadiisa inay ku gacan siiyaan hawshaas.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 02/04/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الـرسمية الجــريــدة

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| Sanadka 1aad | Muqdisho | May 2009 | L. 3 |
|---|---|---|---|

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $ 2 Doollar lambar waliba – RUKUNKA: Sanaddii waa $ 20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

## KOBNIIN

...

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.069, taariikh May 9, 2009- *Dallacaad Saraakiil & Magacaabid* Bog. 6

XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.75, taariikh May 13, 2009- *Ku dhaqanka Shareecada Islaamka* Bog. 7

*Waxaa la daabacay Sanadka 2011*

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

***W. M***

---

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.069,**
**taariikh May 9, 2009**
**Dallacaad Saraakiil & Magacaabid**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 44aad ee Axdiga KMG ah oo awood u siinaya madaxweynaha xil u magacaabista iyo xil u magacaabista iyo xil ka qaadista madaxda Maamulka dawladda.

**Markuu arkay:** In madaxweyne ahaan masuuliyadda ka saaran tahay dib u dhiska noocyada ciidan ee XDS iyo magacaabista taliyayaasha

**Markuu arkay:** baahida weyn ee loo qabo in si rasmi ah dib u dhis buuxa loogu sameeyo ciidanka XDS, loona dhiso noocyada ciidan XDS, sida dhulka, badda iyo Cirka.

**Markuu arkay:** Warqadda ku summadaysayn WG/74/09, kuna taariikhaysan 03/05/2009, kana soo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaarada Gaashaandhigga eek u saabsan talo soo jeedin uu Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga ku soo jeediyay in la magacaabo Taliyayaasha Ciidanka Dhulka, Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha iyo Ciidanka Cirka.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

1. G/Sare Guudle Maxamed Nur waxaa loo dallacsiiyay Sarreeyo Gaas, waxaana loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Dhulka.

2. Admiral Guuto Faarax Axmed Cumar waxaa loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha.

3. Sarreeye Guuto Sulaymaan Maxamuud Qambi waxaa loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Cirka.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 09/05/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.75,**
**taariikh May 13, 2009**
**Ku dhaqanka Shareecada Islaamka**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 44aad faqradiisa 4aad Xarafka (b) ee Axdiga Dawladda FKMG.

**Markuu arkay:** Go'aanka Golaha Baarlamaanka Dawladda FKMG No. XGB/1425/09 ee 18/04/09.

**Markuu garwaaqsaday:** In Shacabka Soomaaliyeed oo Muslimiin ah ay lagama maarmaan tahay in lagu xukumo Diintooda Islaamka ah.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

1. In Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya lagu maamulo oo lagu dhaqo Shareecada Islaamka.

2. In dib u habayn lau sameeyo dhammaan shuruucda iyo qawaaniinta dalka, lagana saaro wixii khilaafsan Shareecada Islaamka.

**Qodobka 2aad**

Fulinta Sharcigan waxaa u xilsaaran dhammaan Hay'adaha Dawladda gaar ahaan Wasaaradda iyo Hay'adda Garsoorka, waxaana laga soo saari doonaa Xeer-nidaamiye u gaar oo lagu faah-faahinayo fulinta sharciga.

**Qodobka 3aad**

Sharcigan wixii ka soo horjeeda ama aan la socon Karin waa la baabi'iyay

**Qodobka 4aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 13/05/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الرسمية الجريدة

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| Sanadka 1aad | Muqdisho | Juun 2009 | L. 4 |
|---|---|---|---|

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $ 2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $ 20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.0091, taariikh June 14, 2009** - ***Magacaabid ku meel gaar ah*** **Bog.** 10

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.104, taariikh June 24, 2009** - ***Dallacsiin Saraakiil*** **Bog.** 11

*Waxaa la daabacay Sanadka 2011*

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

## *W. M*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.0091,**
**taariikh June 14, 2009**
**Magacaabid ku meel gaar ah**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 44aad ee Axdiga KMG |
| **Markuu arkay:** | Xaaladda Ciidamada Qalabka sida ee Soomaaliyeed |
| **Markuu arkay:** | Masuuliyadda ka saaran dib-u-dhiska Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed. |
| **Markuu tixgeliyay:** | Duruufta jirta iyo baahida loo qabo in la dhiso Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa si ku meel gaar ah loo magacaabay:

1. Wasiirka Garsoorka iyo Caddaaladda Md. Cabdiraxmaan Maxamuud Faarax Janaqow Guddoomiye
2. Wasiirka Difaaca Md. Prof. Maxamed Cabdi Gaandi Xubin
3. Wasiirka Amniga Qaranka Md. Cumar Xaashi Aadan Xubin

4. Wasiirka ARrimaha Gudaha Md. Cabdulqaadir Cali Cumar – Xubin

5. Abaanduulaha Ciidanka XDS S/Gaas Yuusuf Xuseen Cusmaan (Dhuumaal)- Xubin

6. Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed S/Gaas Cabdi Xasan Cawaale - Xubin

7. Taliyaha Nabadsugidda S/Guuto Maxamed Sheekh Xasan – Xubin

**Qodobka 2aad**

Waajibka Maxkxamaddu waa inay ku dhaqaan Ciidamada Qalabka Sida Xeerka Ciidanka iyagoo waafajinaya Shareecada Islaamka.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 14/06/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.104,**
**taariikh June 24, 2009**
**Dallacsiin Saraakiil**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 44aad ee Axdiga KMG oo awood u siinaya Madaxweynaha xil u magacaabid iyo xil ka qaadista Madaxda Maamulka Dawladda.

**Markuu arkay:** Xaaladda Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:** | Masuuuliyadda ka saaran dib-u-dhiska Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed. |
| **Markuu tixgeliyay:** | Soo jeedinta Abaanduulaha Guud ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la dallacsiiyay saraakiisha Magacyadooda hoos ku qoran yihiin mid walba darajada ku hor qoran:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Muxudiin Xasan Maxamed | Dhamme |
| 2. | Cabdi Maxamed Maxamuud | L/Xiddigle |
| 3. | Cabdirashiid Cali Xasan | L/Xiddigle |
| 4. | Axmed Xasan Cumar | Xiddigle |
| 5. | Liibaan Cabdulle Cumar | Xiddigle |

**Qodobka 2aad**

Waxaa la farayaa jihada ay waraaqdan ku socoto meel marinta go'aankaas si saraakiishaas u gutaan waajibaadkooda qaran.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 24/06/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 1aad** Muqdisho July 2009 L. 5

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $ 2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $ 20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER

**DECREE OF THE PRESIDENT OF SOMALI REPUBLIC - Lr.105, Date: July 08, 2009-** *Appointment of ambassador to the Republic of Uganda* **Bog.** 14

**DECREE OF THE PRESIDENT OF SOMALI REPUBLIC - Lr.107, Date: July 15, 2009-** *Appointment of ambassador to Itally* **Bog.** 15

*Waxaa la daabacay Sanadka 2011*

---

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

***W. M***

---

**DECREE OF THE PRESIDENT OF SOMALI REPUBLIC - Lr.105, date: July 08, 2009**

**Appointment of ambassador to the Republic of Uganda**

Excellency,

I have appointed our Ambassador to the Republic of Uganda H.E. Sayid Ahmed Sheikh Dahir, a distinguished citizen of the Federal Republic of Somalia, to represent me before your government as Non-Resident Ambassador of the Somalia Republic.

He is well aware of the mutual interests of our two countries and shares my sincere desire to preserve and enhance the long friendship between us.

May faith in his high character and ability gives me full confidence that he will carry out his dutites in a manner fully acceptable to you.

Accordingly, I entrust him to your confidence. I ask that you receive him favorably, and give full credence to what he shall say on the part of the Federal Republic of Somalia as well as to the assurances which he bears of my best wishes for the prosperity of the Republic of Burundi.

Yours very truly

Mogadishu 08/07/2009

President of the Somali Republic

*H.E. Sharif Sheikh Ahmed*

**S.E Piere NKURUNZIZA**
**President of the Republic of Burundi,**
**Bujumbura- Burundi**

**DECREE OF THE PRESIDENT OF SOMALI REPUBLIC -**
**Lr.107, date: July 15, 2009**
**Appointment of ambassador to Itally**

Excellency,

I have appointed Nur Hassan Hussein, a distinguished citizen Somalia, to represent me before your government as Ambassador Extraordinary and plenipotentiary of the Republic of Somalia to the Repuplic of Italy.

He is well aware of the mutual interests of our two countries and shares my sincere desire to preserve and enhance the long friendship between us.

May faith in his high character and ability gives me full confidence that he will carry out his dutites in a manner fully acceptable to you.

Accordingly, I entrust him to your confidence. I ask that you receive him favorably, and give full credence to what he shall say on the part of the Federal Republic of Somalia as well as to the assurances which he bears of my best wishes for the prosperity of Italy.

Yours very truly

Mogadishu 15/07/2009

President of the Somali Republic

*H.E. Sharif Sheikh Ahmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.108,**
**taariikh July 18, 2009**
**Magacaabid Xil Wasiir**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Marxaladda adage e uu waddanku marayo.

**Markuu tixgeliyay:** Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Dawladda KMG ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Markuu arkay:** Baahida loo qabo buuxinta jagadii Wasiirka Amniga Qaranka.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Wuxuu aqbalay Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Dawladda KMG ee Jamhuuriyadda Soomaaliya ee ah in Xilka Wasiirka Amniga Qaranka loo magacaabo Mudane Cabdullaahi Maxamed Cali (Sanbaloolshe).

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 18/07/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| Sanadka 1aad | Muqdisho | Agoosto 2009 | L. 6 |
|---|---|---|---|

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $ 2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $ 20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

## KOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

*W. M*

### BOGGA LABAAD

### XEER

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.115,**

**taariikh August 5, 2009** - ***Magacaabid Xubnaha Maxkamadda***

***Ciidcmada Qalabka Sida*** **Bog.** 20

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.121, taariikh August 5, 2009 - *Dallacsiin Sarkaal*** **Bog. 21**

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.122, taariikh August 5, 2009 - *Diidmo is casilaad*** **Bog. 22**

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.128, taariikh August 18, 2009 - *Xil magacaabid*** **Bog. 23**

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.129, taariikh August 18, 2009 – *DallacsiinSarkaal*** **Bog. 25**

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.126, taariikh August 26, 2009 - *Dallacsiin Saraakiil*** **Bog. 26**

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.126, taariikh August 26, 2009 - *Dallacsiin Saraakiil*** **Bog. 27**

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

*W. M*

---

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.115,**
**taariikh August 5, 2009**
**Magacaabid Xubnaha Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 44aad ee Axdiga KMG oo awood u siinaya Madaxweynaha xil u magacaabid iyo xil ka qaadista Madaxda Maamulka Dawladda.

**Markuu arkay:** Masuuliyadda ka saaran dib-u-dhiska Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed.

**Markuu tixgeliyay:** Soo jeedinta Taliyayaasha.

**Markuu dareemay:** Baahida loo qabo in di-u-dhis lagu sameeyo Maxkamadda Ciidamada.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la magacaabay Xubnaha Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed, waxayna ka kooban yihiin:

1. G/Sare Cismaan Sheekh Axmed (Baallataag) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
2. G/Sare Cabdisalaan Maxamed Faarax
3. G/Sare Maxamuud AxmedABuukar (Ina Sokondo)
4. G/Sare Axmed XasanAxmed
5. G/Sare Abuukar Cali Axmed
6. G/Dhexe Xasan Maxamed Xasan

**Xeer Ilaaliye:** G/Sare Abuukar Sheekh Abuukar Maxamed

**Qodobka 2aad**

Ujeedka Dikreetadan waxay waafaqsan tahay sharciga soo baxay 31ka Maarso 1964, lambarkiisa 2aad (No 2).

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 05/08/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.121, taariikh August 5, 2009 Dallacsiin Sarkaal**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 44aad ee Axdiga KMG oo awood u siinaya Madaxweynaha xil u magacaabid iyo xil ka qaadista Madaxda Maamulka Dawladda.

**Markuu arkay:** Xaaladda Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed

**Markuu arkay:** Masuuliyadda ka saaran dib-u-dhiska Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed.

**Markuu tixgeliyay:** Soo jeedinta Abaanduulaha Guud ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Xasan Maxamed Xuseen loo dallacsiiyay Darajada G/Dhexe

**Qodobka 2aad**

Waxaa la farayaa jihada ay waraaqdan ku socoto meel marinta go'aankaas si sarkaalkan u guto waajibkiisa Qaran.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 05/08/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.122, taariikh August 5, 2009**
**Diidmo is casilaad**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 44aad ee Axdiga KMG oo awood u siinaya Madaxweynaha xil u magacaabid iyo xil ka qaadista Madaxda Maamulka Dawladda. |
| **Markuu arkay:** | Xaaladda nabad gelyo ee uu waddanku marayo. |
| **Markuu arkay:** | Masuuliyadda ka saaran dib-u-dhiska Ciidamada Qalabka sida ee Soomaaliyeed. |
| **Markuu ka fiirsaday:** | Is casilaadda Taliyaha Hay'adda Nabad Sugidda Qaranka iyo ku-xigeenkiisa. |
| **Markuu tixgeliyay:** | Baahida loo qabo adkeynta Hay'adda Nabad Sugidda Qaranka. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la diiday is casilaadda ay soo jeediyeen:

1. Gen. Maxamed Sheekh Xasan- Taliyaha Hay'adda Nabad Sugidda Qaranka.

2. Gen. Nuur Maxamed Maxamuud (Nuur Shirbow) Ku-xigeenka Taliyaha Hay'adda Nabad Sugidda Qaranka.

**Qodobka 2aad**

.Waxaa la farayaa Taliyaha iyo ku-xigeenkiisu in ay hawsha ay Qaranka u hayeen u gutaan si xilkasnimo ku jirto oo waddaniyad leh.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 05/08/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.128,**
**taariikh August 18, 2009**
**Xil magacaabid**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 44aad ee Axdiga KMG oo awood u siinaya Madaxweynaha xil u magacaabid iyo xil ka qaadista Madaxda Maamulka Dawladda. |
| **Markuu arkay:** | Xaaladda Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed |
| **Markuu arkay:** | Masuuliyadda ka saaran dib-u-dhiska Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed. |
| **Markuu tixgeliyay:** | Soo jeedinta Abaanduulaha Guud ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa saraakiisha soo socota loo magacaabay midba hoggaanada ku hor qoran:

1. G/Sare C/qaadir Macallin Nuur Taliyaha Hoggaanka Saadka iyo Taakuleynta XDS.
2. G/Sare Cali Maxamed Kulane: Taliyaha Hoggaanka Ciidanka iyo Saraakiisha XDS.
3. G/Sare Ismaaciil Khaliif Shire: Taliyaha Hoggaanka Hawl gelinta XDS.
4. G/Sare Mustaf Mursal Maxamed: Taliyaha Hoggaanka Tababarka iyo Xiriirka Dibadda XDS.
5. G/Sare Cabdi Cali Axmed (Jamaame): Taliyaha Hoggaanka Sahanka iyo Wardoonka XDS.
6. G/Sare Axmed Budul: Madaxa Xiriirka AMISOM iyo XDS

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 18/08/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.129,**
**taariikh August 18, 2009**
**Dallacsiin Sarkaal**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 44aad ee Axdiga KMG oo awood u siinaya Madaxweynaha xil u magacaabid iyo xil ka qaadista Madaxda Maamulka Dawladda.

**Markuu arkay:** Masuuliyadda ka saaran dib-u-dhiska Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed.

**Markuu tixgeliyay:** Soo jeedinta taliyayaasha.

**Markuu garwaaqsaday:** Baahida loo qabo in dib-u-habayn lagu sameeyo maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la magacaabay Xubnaha Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida, Xubnahaasi oo kala ah:

1. S/Guuto Xaaji Cali Xasan Guddoomiye
2. G/Sare Cabdisalaam Maxamed Faarax
3. G/Sare Maxamuud Axmed Abuukar (Ina Sokondo)
4. G/Sare Xasan Maxamed Xersi
5. Dhamme Cabdi Isaaq Xasan: Xeer Ilaaliye
6. Dhamme Cabdullaahi Cabdi Weheliye: Ku-xigeen Xeer ilaaliye

**Qodobka 2aad**

Ujeeddada dikreetadan waxay waafaqsan tahay sharciga soo baxay 31da Maarso 1964, lambarkiisa 2aad (No 2).

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 18/08/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.126,**
**taariikh August 26, 2009**
**Dallacsiin Saraakiil**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 44aad ee Axdiga KMG oo awood u siinaya Madaxweynaha xil u magacaabid iyo xil ka qaadista Madaxda Maamulka Dawladda. |
| **Markuu arkay:** | Xaaladda Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed |
| **Markuu arkay:** | Masuuliyadda ka saaran dib-u-dhiska Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed. |
| **Markuu tixgeliyay:** | Soo jeedinta Abaanduulaha Guud ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Saraakiisha magacyadooda hoos ku qoran tahay loo dallacsiiyay mid walba darajada ku hor qoran:

| | |
|---|---|
| 1. Cabbaas Cali Ibraahim | G/Dhexe |
| 2. Xuseen Aadan Faarax | G/le |

| | |
|---|---|
| 3. Maxamed Nuur Abiikar | G/le |
| 4. Cabdi Cumar Xareed | L/X/le |
| 5. Cabdi Maxamed Shire | L/X/le |

**Qodobka 2aad**

Waxaa la farayaa jihada ay waraaqdan ku socoto meel marinta go'aankaas si saraakiishaasi ay u gutaan waajibaadkooda Qaran.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 26/08/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.126, taariikh August 26, 2009**
**Dallacsiin Saraakiil**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 44aad ee Axdiga KMG oo awood u siinaya Madaxweynaha xil u magacaabid iyo xil ka qaadista Madaxda Maamulka Dawladda. |
| **Markuu arkay:** | Xaaladda Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed |
| **Markuu arkay:** | Masuuliyadda ka saaran dib-u-dhiska Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed. |
| **Markuu tixgeliyay:** | Soo jeedinta Abaanduulaha Guud ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Saraakiisha magacyadooda hoos ku qoran tahay loo dallacsiiyay mid walba darajada ku hor qoran:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Axmed Saciid Xaashi | G/Dhexe |
| 2. | C/risaaq Cabdullaahi Axmed | G/le |
| 3. | Cali Yuusuf Bulxan | Dhamme |
| 4. | C/kaafi Cabdiweli Axmed | Dhamme |
| 5. | Maxamed Faarax Obsiye | L/X/le |

**Qodobka 2aad**

Waxaa la farayaa jihada ay waraaqdan ku socoto meel marinta go'aankaas si saraakiishaasi ay u gutaan waajibaadkooda Qaran.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 26/08/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الـرسمية الجـريـدة

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| Sanadka 1aad | Muqdisho | November 2009 | L. 7 |
|---|---|---|---|

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah ee ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $ 2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $ 20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

## KOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

*W. M*

### BOGGA LABAAD

### XEER

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.172, taariikh November 5, 2009 -** ***Magacaabid Guddi si kmg ah u maamula G/Banaadir*** **Bog. 30**

**PRESIDENT OF REPULIC OF SOMALIA - Lr.177, date November 9, 2009 -** ***Letter of appointment*** **Bog. 32**

*Waxaa la daabacay Sanadka 2011*

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

*W. M*

---

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.172, taariikh November 5, 2009**
**Magacaabid Guddi si kmg ah u maamula G/Banaadir**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 44aad Faq. 1 (e) ee Axdiga KMG J.S

**Markuu arkay:** Qodobka 85 ee Dastuurkii 1961kii

**Markuu arkay:** Sharciga Maamulka G/Banaadir Lr. 121 ee 17/9/72 iyo Dekreetada Maamulka Shaqaalaha D/hoose ee Muqdisho L. 21/2/1976kii.

**Markuu arkay:** Xeer Sharci Lr. JS/XM/0171/09 ee soo baxay 5/11/2009, kuna saabsanaa Dhismaha Guddi Maamul ee Gobolka Banaadir.

**Markuu tixgeliyay:** Go'aanka Golaha Wasiirrada Lr. XRW/00898/11/09 iyo Talo soo jeedinta Wasiirka A. Gudaha Lr. XWG/10/09.

**Markuu tixgeliyay:** Xaaladda deg-degga ah ee dalka lagu soo rogay.

**Markuu garwaaqsaday:** In loo baahan yahay in G/Banaadir loo magacaabo Guddi maamul cusub oo si ku meel gaarah u maamuli doona dhammaan hawlaha Gobolka Banaadir una sii hayn doona xilkaas inta laga soo dhameystiro sharcigii maamulka magaalada Muqdisho & G/Banaadir.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la magacaabayaa Guddi Maamul oo si ku meel gaar ah u sii maamuli doona G/banaadir inta laga soo dhameystirayo sharcigii Maamulka Magaalada Muqdisho & G/Banaadir.

**Qodobka 2aad**

Xubnaha Guddiga Maamulka G/banaadir iyo xilalkooduba waxay kala yihiin sida soo socota:

1. Mudane **Cabdirisaaq Maxamed Nuur**: Waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha Maamulka Gobolka Banaadir isla markaana ah Duqa magaalada Muqdisho.

2. Mudane **Cabdisalaan Daahir Cabdulle**: Waxaa loo magacaabay Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Arrimaha Siyaasadda iyo Bulshada.

3. Mudane **Warsame Maxamed Xasan**: waxaa loo magacaabay Guddoomiye ku xigeenka 2aad ee Arrimaha Nabad gelyada iyo Xasiloonida Guud.

4. Mudane **Iimaan Nuur Iikar**: Waxaa loo magacaabay Guddoomiye ku xigeenka 3aad ee Arrimaha Maamulka & Maaliyadda.

5. Mudane **Cabdikaafi Cusmaan Hilowle:** Waxaa loo magacaabay Xoghayaha Guud ee Gobolka.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 05/11/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**PRESIDENT OF REPULIC OF SOMALIA - Lr.177,**
**date November 9, 2009**
**Letter of appointment**

PRESIDENT OF REPULIC OF SOMALIA

HAVING RECOGNIZED the necessity of appointing an Honorary Consul resident in Istanbul

RECOGNIZING the work Mr. Sermet Cetin has done to this end for the Somali people and the Somali embassy in Turkey.

HAVING a mutual interest that Mr. Sermet Cetin constitutes in his efforts for Somalia.

I, SHARIF SHEIKH AHMED, President of the Somali Government, hereby confirm the appointment of:

Mr. SERMET CETIN

as

HONORARY CONSUL IN STANBUL

With the duty to exercise the functions of his office subject to the instructions of Minister of foreign affairs of Somalia. Mr. Sermet Cetin is thereby entrusted with all the tasks and duties within the scope of this appointment.

I request the Government of Turkey to recognize the said Mr. Sermet Cetin in his capacity as Honorary Consul of the Republic of Somalia in Istanbul and to require the local authorities to accord him all proper countenance and assistance in the discharge of his functions and to extend him all honors and privileges rightfully appertaining to his office, starting this 9th Day November the year 2009.

MOGADISHU 09/11/2009

President of Somalia

*H.E. Sharif Sheikh Ahmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| Sanadka 1aad | Muqdisho | December 2009 | L. 8 |
|---|---|---|---|

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $ 2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $ 20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $ 50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

## KOBNIIN

—

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

*W. M*

### BOGGA LABAAD

### X E E R

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.206, taariikh December 8, 2009-** ***Magacaabid Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda*** **Bog.** 36

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.207, taariikh December 8, 2009-** ***Xil ka qaadis labo Agaasime Guud*** **Bog.** 37

*Waxaa la daabacay Sanadka 2011*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.208, taariikh December 09, 2009-** ***Magacaabid Taliyaha Ciidamada Booliska Soomaaliyeed*** **Bog.** 38

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.209, taariikh December 10, 2009-** ***Xil ka qaadidda Taliyaha Ciidanka Xoogga dalka Soomaaliyeed*** **Bog.** 39

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.210, taariikh December 10, 2009-** ***Xil ka qaadidda Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed*** **Bog.** 40

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.211, taariikh December 09, 2009-** ***Magacaabid Taliyaha Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliya*** **Bog.** 41

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.215, taariikh December 14, 2009-** ***Beddelaad Wasiir*** **Bog.** 42

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.216, taariikh December 14, 2009-** ***Magacaabid Wasiir*** **Bog.** 43

**PRESIDENT OF SOMALI REPUBLIC - Lr.217, date December 16, 2009-** ***Appointment of former Prime Minister Nur Hassan Hussein (Nur Adde) as Somali Ambassador to Belgium*** **Bog.** 44

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.147, taariikh** November, 21, 2006 ***Siin Dhul*** **Bog.** 45

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

***W. M***

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.206,**
**taariikh December 8, 2009**
**Magacaabid Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad, Faqradda (2) Xarafka, Qodobka 44aad (E) iyo Qodobka 71aad Xarafka 2aad ee Axdiga Federalka KMG ee J.S.

**Markuu arkay:** Qodobka 42aad Xarafka 2aad Faqradda j ee Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda Lr. 01 taariikh 05/12/09.

**Markuu daalacay:** Go'aanka soo gudinta Magacaabidda Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda summad XRW/00065/12/09, taariikh 06.12.2009 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisiul Wasaaraha.

**Markuu tixgeliyay:** Jagada xoghayaha joogtada ah oo bannaan oo ay waajib tahay in la buuxiyo si ay dan ugu jirto maslaxadda Ummadda Soomaaliyeed.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan waxaa Danjire Cabdisalaan Xaaji Axmed (Dhabannacad) loo magacaabay Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 08/12/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.207, taariikh December 8, 2009 Xil ka qaadis labo Agaasime Guud**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad, Faqradda 2aad, Qodobka 44aad Xarafka (e) iyo Qodobka 71aad faqradda 2aad ee Axdiga Federalka KMG ee J.S.

**Markuu arkay:** Qodobka 45aad xarafka (sh) iyo Qodobka 46aad faqradda 2aad xarafka (t) ee Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda Lr. 01 taariikh 05/12/06

**Markuu dhuuxay:** Go'aankii xil ka qaadista Labada Agaasime Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda summad XRW/00057/12/09 taariikh 02/12/2009 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa xilka laga qaaday Labada Agaasime Guud ee kala ah:

1. Mudane Maxamed Jaamac Cali: Agaasimaha Guud ahaana Ku-simaha Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda.
2. Dr. Cabdi Maxamed Culusow: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 08/12/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.208, taariikh December 09, 2009**
**Magacaabid Taliyaha Ciidamada Booliska Soomaaliyeed**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad, Xarafka 1aad Faqradda B iyo Xarafka (2), Qodobka 44aad (E) iyo Qodobka 71aad Xarafka 2aad ee Axdiga Federalka KMG ee J.S.

**Markuu garwaaqsaday:** Xaaladda Nabad gelyo ee uu dalku marayo iyo baahida loo qabo dhisidda Ciidamada Qalabka Sida.

**Markuu tixgeliyay:** Soo gudinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee XRW/00071/12/09, taariikh 07.12.2009 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu arkay:** Jagada Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed oo bannaan oo ay waajib tahay in la buuxiyo si ay dan ugu jirto maslaxadda Ummadda Soomaaliyeed.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan Waxaa S/Guuto Cali maxamed Xasan Looyaan loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 09/12/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.209, taariikh December 10, 2009**
**Xil ka qaadidda Taliyaha Ciidanka Xoogga dalka Soomaaliyeed**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad, Faqradda 1aad Xarafka B, Qodobka 44aad (2) iyo Qodobka 71aad Xarafka 2aad ee Axdiga Federalka KMG ee J.S.

**Markuu dhuuxay:** Go'aanka soo gudbinta Xil ka qaadista Taliyaha Ciidanka Xoogga dalka Soomaaliyeed summad XRW/00071/12/09, taariikh 02.12.2009 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynuhu xeerkan soo saxiixo waxaa xilka laga qaaday Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed S/Gaas Yuusuf Xuseen Cusmaan (Dhuumaal)

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 10/12/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.210,**
**taariikh December 10, 2009**
**Xil ka qaadidda Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad, Faqradda 1aad Xarafka B, Qodobka 44aad (2) iyo Qodobka 71aad Xarafka 2aad ee Axdiga Federalka KMG ee J.S.

**Markuu dhuuxay:** Go'aanka soo gudbinta Xil ka qaadista Taliyaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed summad XRW/00071/12/09, taariikh 02.12.2009 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynuhu xeerkan soo saxiixo waxaa xilka laga qaaday Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed S/Gaas Cabdi Xasan Cawaale (Qaybdiid)

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 10/12/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.211, taariikh December 09, 2009 Magacaabid Taliyaha Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliya**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad, Xarafka 1aad Faqradda B iyo Xarafka (2), Qodobka 44aad (E) iyo Qodobka 71aad Xarafka 2aad ee Axdiga Federalka KMG ee J.S.

**Markuu garwaaqsaday:** Xaaladda Nabad gelyo ee uu dalku marayo iyo baahida loo qabo dhisidda Ciidamada Qalabka Sida.

**Markuu tixgeliyay:** Soo gudinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee XRW/00072/12/09, taariikh 07.12.2009 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu arkay:** Jagada Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo bannaan oo ay waajib tahay in la buuxiyo si ay dan ugu jirto maslaxadda Ummadda Soomaaliyeed.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynuhu xeerkan soo saxiixo waxaa G/Sare **Maxamed Geelle Kaahiye** loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Xoogga dalka Soomaaliya, isla markaana loo dallacsiiyay Darajada S/Guuto.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 09/12/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.215,**
**taariikh December 14, 2009**
**Beddelaad Wasiir**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad, Faqradda 2aad, Qodobka 44aad (E) ee Axdiga Federalka KMG ee J.S.

**Markuu garwaaqsaday:** In ay jirto baahida loo qabo daboolidda kaalinta mugga leh ee xilka Wasiirka Wasaaradda Hiddaha & Tacliinta Sare ee xukuumadda, ayna waajib tahay in la buuxiyo jagadaas bannaanaatay uuna ka geeriyooday Wasiirkii hore uga tirsanaa xukuumadda FKMG

**Markuu tixgeliyay:** Warqadda summad XRW/00579/08/09 ee ku taariikhaysan 13/12/2009 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, ujeedadeeduna ahayd Magacaabid **Wasiir.**

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynuhu xeerkan saxiixo waxaa **Maxamed Cabdullaahi Oomaar** laga beddelay Xilkii Wasiirnimo ee Wasaaraddii uu horay u sii joogay, waxaana loo beddelay Wasiirka Wasaaradda Hiddaha & Tacliinta Sare.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 14/12/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr.216,**
**taariikh December 14, 2009**
**Magacaabid Wasiir**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 13aad, Faqradda (2), Qodobka 39aad faqradda 2aad, qodobka 44aad Xarafka (E) ee Axdiga Federalka KMG ee J.S.

**Markuu garwaaqsaday:** In ay jirto baahida loo qabo dhameystirka qaab-dhismeedka Xukuumadda, iyo inay lagama maarmaan tahay in la buuxiyo jagooyinkii bannaanaaday oo ay ka geeriyoodeen wasiirradii horay uga tirsanaa xukuumadda.

**Markuu tixgeliyay:** Warqadda summad XRW/00579/08/09 ee ku taariikhaysan 13/12/2009 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, ujeedadeeduna ahayd Magacaabid **Wasiir.**

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynuhu xeerkan saxiixo waxaa **Cabdi Xasan Cawaale** laga beddelay Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 14/12/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**PRESIDENT OF SOMALI REPUBLIC - Lr.217,
date December 16, 2009
Appointment of former Prime Minister Nur Hassan Hussein (Nur Adde) as Somali Ambassador to Belgium**

H.M. King Albert II, King of The Belgians

Royal Palace

Brussels, Belgium

The president of the Transitional Federal Government of Somalia, H.E. Sharif Sheikh Ahmed presents his compliments to the King of the Belgians H.M. Albert II.

He has, furthermore, the priviledge of informing the H.M. that, on proposal of the Government of National Unity of Somalia précised by H.E. Prime Minister Omar Abdirashid Ali Sharmarke; he nominates H.E. Nur Hassan Hussein "Adde" as Ambassador Extraordinaire and Plenipotentiary to Belgium. Mr. Nur Hassan Hussein "Adde" is also the Somali Government Ambassador to Italy and the European Union.

This appointment of Mr. Hussein, former Prime Minister of the Transitional Federal Government of Somalia and distinguished humanitarian personality in Somalia and Africa, is intended to underline the importance My government attaches to the special relationship it has with Belgium. Ambassador Husein will strengthen and expand this priviledged relationship at this historic moment when Somalia faces new challenges and the support of Belgium and the EU is most crucial.

Excellency, My Government is looking forward to a favourable response of Your Majesty to this appointment and sends the assurance of its highest consideration.

Please accept, Your Majesty, the assurance of my highest consideration

MOGADISHU 16/12/2009

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J.SOOMAALIYA-Lr 147/06**
**Taariikh November, 21 2006**

**Siin Dhul**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Fed. Soomaaliya**

**Markuu Arkay:** Codsiga Shirkadda Daay-Maroodi Real Estate & Trading Co. ee ku Sumadeysan DM/RETC/0213/06 ee Taariikh 23/09/2006, kuna saabsan siin Dhul mashruuceed ku yaal Degmada Wardhiigley, Cabirkiisuna yahay 190m X 200m, kuna fadhiya 38,000mq, kaasoo laga fulinaayo Mashruuc dhismo Suuq Weyne Ganacsi oo casri ah (Shopping Complex).

**Markuu Arkay:-** Qodobka 44aad Faqradda 1aad Xarafka "e" ee Axdiga KMG ah.

**Markuu Arkay:-** Sharci No.10 ee soo baxay 17/12/1998 kuna saabsan Maamulka Dhulk Dhismaha ee Gobolka Banaadir.

**Markuu Arkay:-** In Dhulka la tilmaamaayo uu yahay dhul dan guud horey Dowladdu U Qaadatay oo haatan dhaqanbax ah, ayna ku dhaqmi jireen Wasaaradaha Beeraha, Ganacsiga & Maaliyadda.

**Markuu Arkay:-** Talo soo jeedinta Gudoomiyaha Gobolka Banaadir, ahna Duqa Magaalda Muqdisho iyo warbixintiisa la xiriirta faa'iidooyinka dhinacyada badan ee uu la imaanayo Mashruucaas sida maalgashiga, Ganacsiga iyo Bilicda Magaalada.

**Markuu Arkay:-** In Shirkadda Daay-Maroodi ay tahay Shirkad leh sumcad wanaagsan iyo Khibrad dheer ee shaqo, milkiilayaasheeduna ay yihiin Ganacsato ka soo Jeedda Deegaanka oo dhulkaasi horey loogala wareegay.

**Markuu Garwaaqsaday:-** In Danta Dalka ay ku jirto in lagu Dhiirigeliyo Ganacsatada inay Maalgashi ku sameeyaan Dalka, kana Fuliyaan Mashaariic noocaan ah.

***Wuxuu soo saaray Xeerkaan***

**Qodobka 1aad**

Waxaa Danta guud aawgeed lagu wareejiyay Shirkadda Daay-Maroodi Real Estate & Trading Co. Dhulka kor ku tilmaaman oo ku fadhiya 38,000 mq, kuna yaal Degmada Wardhiigley ee Gobolka Banaadir si looga dhiso Suuq Weyne Ganacsi ee Casri ah sida ku cad naqshadda lifaaqa ah.

**Qodobka 2aad**

Waxaa la farayaa Dowladda Hoose ee Gobolka Banaadir in ay u dhameystirto Shirkada Daay-Maaroodi wixii habraac ah ee la xiriira Milkiyad wareejinta dhulkaasi, kana saarto Danta Guud.

**Qodobka 3aad**

Xeerkaan wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka KMG ah ee Soomaaliya, Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**MUQDISHO 21,2006**

**Cabdullahi Yuusuf Axmed**
**Madaxweynaha J.Soomaaliya**